

A Message from

# The Professional Development Team



Washington State Department of  
**CHILDREN, YOUTH & FAMILIES**

## Wargayska PD!

*Taageerida macalimiinta waaweyn ee daryeela waxna bara caruurta yaryar ee Washington State.*

Wargayskaan sadexdii biloodlaha ah ee Washington State Department of Children, Youth, and Families (DCYF), waxaa loogu talo geley in bulshada Washington ee waxbarashada dhallaanka uu la socodsiyo si joogto ah dhamaan qaybaha shaqooyinka wanaagsan si ay u sameeyaan [Hormarinta Xirfadlayaasha](#) iyo [Early Achievers](#).



## Wargeyskan...

- [Akhibaarahaa Early Achievers](#)
- [Early Achievers waxay Qiimaysaa oo Hawlgalisaa Kooxaha Shaqada ee Raadinaya Adeeg Bixiyeyaa!](#)
- [Hagaha Qalabka Dib u Eegista Diiwaanada Hadda La Heli Karaa!](#)
- [La kulan Isku-duwayaasha Waaxda Helitaanka Luuqadda Waxbarashada Hore!](#)
- [Samee Sahanka xog aruurinta Farm to ECE Survey oo ku guulayso ilaa \\$50!](#)
- [Kala qeybqaado Farm to ECE](#)
- [Waxyabaha xiisaha leh ee ka cusub Nidaamka Xaqijinta Waxbarashada!](#)
- [Talooyin loogu talagalay Akhrinta Shaashada kore Shahaadooyinka Shaqaalahaa](#)
- [Xusuusin Tababarka: Hel dhibcaha ee Saacadaha Adeegga Gudhiisa](#)
- [Xogaha Xeerka Fursadaha Billoowga Dhallaanka ee Loo Siman yahay: Naqshadeynta Labada Luuqad iyo Daryeelka Xog ogaalka ah ee Dhaawaca](#)
- [Magacaabidda Labada Luuqadood, Gu'ga soo socda ee 2023!](#)
- [Kheyraadka Horumarinta Xirfadlaha ee Barashada Luuqadaha Badan](#)
- [Goobta Tababarka cusub ee DCYF- Waxaa la qabanayaa 2023!](#)
- [Taxanaha siminaarka guga](#)
- [Barnaamijka Tababarka iyo Tababarada Gobolku Ansixiyay](#)
- [Taageerada Shaqaalahaa ECE ee Waxbarashada](#)
- [Deeqaha Waxbarashada Early Achievers: Sheeqooyinka Guulaha](#)
- [Rukumo Wargeeska PD](#)
- [Sidee Ayaynu Nahay?](#)

---

## Akhbaaraha Early Achievers

Si aan si wanagsan ugu adeegno shaqaalaheena, kooxda Early Achievers iyo kooxda Horumarinta Xirfadlayaasha ee DCYF hadda waa hal koox.

Si wada jir ah, waxaan awooda saari doonaa taageerada shaqaalaha, tayada, waxbarista iyo waxbarashada!

Qaybtan warsidaha ah waxa ay ku siinaysaa macluumaadka iyo wararka cusub ee ku saabsan [Early Achievers](#).



---

## Hagaha Qalabka Dib u Eegista Diiwaanada Hadda La Heli Karaa!

Dib u eegida Diiwaanada Early Achievers waa fursad ka qaybgalayaasha Early Achievers si ay u aqoonsadaan, dib ugu milicsadaan, oo ay u kobcaan. Waa ***ikhtiyaari*** in la gaaro wax ka badan Heerka Hubinta Tayada 3 ee Early Achievers.

Ka dib marka la dhammeeyo boga Borofaylka Barnaamijka iyo laba Qodob oo Fiidiyow ah, barnaamijyadu waxay dooran karaan Dib u eegis Diiwaanada oo leh aagagga Heerka Tayada ee hadda la hirgeliyay. Kheyraadka dhawaan la sameeyay, ***Aalada Hagitaanka Dib u eegista Diiwaanada***, waxay kaa caawin doontaa inaad go'aansato qeybaha Heerka Tayada ee aad fulisay, oo waxay kaa caawin doontaa inaad isku darto tirada dhibcood ee aad codsan karto heerkaaga Tayada ee xiga.



### Aalada Hagitaanka Dib u eegista Diiwaanada

Hagitaankan waxaa lagu heli karaa [Ingiriisi](#), [Isbaanish](#), [Soomaali](#). Waxa kale oo aad ka heli kartaa kheyraadkan, iyo agabka Dib u eegista Diiwaanada [CECI](#) (horaan loo yaqinay Coaching Companion). Wuxaan kugu dhiirigelinaynaa inaad la hadasho tababarahaaga, kaasoo kugu hagi kara habraaca.

---

# La kulan Isku-duwayaasha Waaxda Helitaanka Luuqadda Waxbarashada Hore!



Abdullahi Abdullahi (Sawirka bidix) iyo Casandra Wilkerson (Sawirka midig) ayaa halkan u jooga si ay u taageeraan xuquuqda sinaanta luqadda ee waxbarashada hore, Isbaanishka iyo bulshada ku hadla Soomaaliga.

Qayb ka mid ah shaqadooda waxaa ka mid ah la xiriritaanka shaqaalaha waxbarashada hore si ay uga ogaadaan baahiyaha bulshada ama danaha ku lug leh helitaanka luqadda.

Haddii aad jeelaan lahayd inaad ku darsato isku-duwayaasha helitaanka luqadda waxbarashada hore si aad ula wadaagto ama ugala hadasho maclummaadka la xiriira helitaanka luqadda sida agabka, tababarada, iyo/ama xiriirka isgaarsiin ahaaneed ama haddii aad u baahan tahay taageero helitaanka maclummaadka, fadlan xor u noqo inaad la xidhiidho isku-duwayaasha taleefanka ama iimayl. Wuxaan diyaarin lahayn kulan lagu qabto zoon ka haddii loo baahdo!

*Kala xiriir: Abdullahi*

Abdullahi [Abdullahi.abdullahi@dcyf.wa.gov](mailto:Abdullahi.abdullahi@dcyf.wa.gov) ama  
taleefonka 360-706-3562 (Af-Soomaali)

*Kala xiriir: Casandra*

Wilkerson [Cassandra.wilkerson@dcyf.wa.gov](mailto:Cassandra.wilkerson@dcyf.wa.gov) ama  
talefoonka 509-823-6517 (Español)

## Samee Sahanka xog aruurinta Farm to ECE Survey oo ku guulayso ilaa \$50!

Barnaamijkaagu ma baraa caruurga cunto, cilmiga beeraha ama nafaqo? Miyaad adeegsataa cuntooyinka maxaliga ah wakhtiga cuntada ama cuntooyinka fudud? Ma leedahay beer ama ma ku beerataa dhir gudaha fasalka? Ma jeelaan lahayd? **Haddii sidaas tahay, waxaan rabnaa inaad nala soo socodsiiso!**



Ka qaybgalayaashu waxay ku guuleysan karaan mid ka mid ah **42 kaararka hadiyada Amazon oo dhan ilaa \$50**, sahamintuna waxay qaadataa kaliya 20-30 daqiiqo in la dhamaystiro. Macluumaadka sahanka waxaa loo isticmaali doonaa samaynta kheyraad, tababarada iyo taageerada barnaamijka Farm to ECE gudaha iyo gobolka oo dhan.

Sahanka xog aruurin ahaaneed **Febraayo 20keeda ilaa Maarsa 10keeda**.

**Samee Sahanka Xog aruurin ahaaneed!**

---

## Kala qeybqaado Farm to ECE

Ma ogtahay in barnaamijka Farm to Care to Early Care and Education (ECE) uu ka caawin karo barnaamijkaaga inuu bilaabo beer, ama kugu xiro beeraleyda deegaankaaga?

Farm to ECE waxay ku dartaa hawl kasta oo kor u qaadaysa aqoonta cuntada, nafaqaynta wanaagsan, iyo isku xirka habka cuntadeena loo beero, la goosto ama la raadiyo.

Farm to ECE waxay ka faa'iidaysan kartaa barnaamijyada iyo bulshadooda iyagoo siinaya fursado waxbarasho oo khibrad leh, taageeraya ganacsiyada maxalliga ah, la macaamilka qoysaska, iyo abuurista caadooyin caafimaad leh oo nolosha oo dhan ah.



### Ku xariiri

Si aad wax badan uga ogato Farm to ECE ka eeg [websaytka WA F2ECE](#) oo kusoo biir [bulshada WA F2ECE](#).

---

## **Waxyabaha xiisaha leh ee ka cusub Nidaamka Xaqijinta Waxbarashada!**

Ma haysataa shahaado heer jamacadeed ah oo caalami ah oo u baahan in lagu xaqijiyo MERIT? Dhawaan miyaad bogtay shahaado heer jaamacadeed ah ama shahaado intaad ku jirtay deeqda Early Achievers?

Nidaamka xaqijinta DCYF waa isbedelay oo hadda way fududahay in la dhamaystiro! Nidaamka la cusbooneysiyy wuxuu yareeyaa caqabadaha, waqtiga iyo kharashaadka adeeg bixiyaasha. [Wargalinta oo buuxda halkan ka akhri.](#)



- **Loogu talagalay adeeg bixiyeyaasha ka tirsan waxbarashada caalamiga ah:** Nidaamkii hore wuxuu u baahnaa adeeg bixiyayaasha inay si xirfad leh u turjumaan agabkooda waxbarasho, oo ay ka helaan qiimayn koorasba kooras shirkad saddexaad. Midani mar dambe ma noqon doonto kiis. Khabirka Baaritaanka Shahaadoyinka DCYF ayaa hadda xaqijin doona dhamaan shahaadoyinka waxbarashada caalamiga ah ee la kasbaday.
- **Loogu talagalay ardayda/adeeg bixiyeyaasha deeqda Early Achievers:** DCYF waxay hadda diiwaan gelin doontaa waxbarashadooda dhammaatay iyagoo ka wakiil ah bixiyeyaasha, ka xorayn doonta adeega bixiyeyaasha inay talaabadan sameeyaan.

### **Xaqiji Shaahaadaada heerka Jaamacadeed ee Caalamiga ah**

Haddii aad haysato shahaado heer jamacadeed ah oo caalami ah oo aad jeelaan lahayd in lagu siiyo dhibcaha xaqijinta, waxaad ku bilaabi kartaa codsiga waxbarashada [MERIT](#). Tilmaamaha sida loo buuxiyo codsiga waxbarashada waxay ku yaalaan bogga [websaytka Diwaanka Shaqaalaha MERIT](#) ee ka hooseeya “Education Application Instructions.”

Su'aalaha ku saabsan habkan, ama sida loo soo gudbiyo shahaadadaada caalamiga ah, iimayl [MERIT](#).

---

### **Talooyin loogu talagalay Akhrinta Shaashada kore Shahaadoyinka Shaqaalaha**

[MERIT](#), Haddii aad leedahay door ruqsad leh, waxaa kale oo aad yeelan doontaa shaashada kore ee shahaadoyinka shaqaalaha. Midani waxay ka micnaysan tahay inaad arki doonto codaynta farsamada midabaynta shahaadoyinka door ahaaneed ee kala duwan ee laga yaabo inaad leedahay. Waxaan aragnay kororka tirada dadka isticmaalaya shaashadooda kore, taas oo aad u fiican! Hoos waxaan ku tilmaanay qaar ka mid ah talooyin iyo xasuusin.



### **Talooyin ay tahay inaad maskaxda ku hayso**

- Haddii qayb ka mid ah shaashada ee jaale ah, tani waa caadi! Waxay ka dhigan tahay in qofkani horumarayo oo tani waxay raacaysaa sharciga ruqsada.

- Ka dhaafitaanka ruqsada shaatiga ama dhaarta **shardi ma aha** halka qof uu ka shaqaynayo si uu u buuxiyo shuruudaha waxbarasho ee buuxa, ama marka ay wax socdaan (jaallaha ku yaala shaashada kore).
- Haddii aad haysato shay casaan ah oo ku yaal shaashada kore, talaabo ayaa loo baahan yahay in la qaado.
  - Xaaladaha qaarkood, si fudud u calaamadinta ikhtiyaarka aad qaadanayso si aad u buuxiso shuruudaha doorkaaga ayaa ku filan inaad ka bedesho casaan una beddelato jaalle.
    - *Tusaale*: Haddii aad xiisaynayso inaad dhammaystirto ikhtiyaarka khibradda leh ee looga baahan yahay waxbarashadaada, calaamadaynta taasi waxay u beddeli doontaa heerkaaga 'horumarka', taasoo ka dhigaysa shaashada kore ee jaale ah.
- Cagaarka shaashaada kore waxay ka dhigan tahay in shayga si buuxda loo daboolay, oo aan loo baahnayn tallaabo dheeraad ah.

### Ku xiriiri!

Aan hubin ikhtiyaarka adiga kugu haboon? Nala soo xiriir! Kooxda [Hagitaanka MERIT](#) ayaa jooga si ay kuu caawiyaan! Iimaylka: [merit@dcyf.wa.gov](mailto:merit@dcyf.wa.gov).

Si aad u hesho sharaxaad buuxda oo ku saabsan shaashada kore iyo ikhtiyaarada shahaadooyinka, oo ay ku jiraan khibrad, tababar ama waxbarasho, booqo shabakadayada:

#### Waxbarashada iyo Websaytka u dhigma

## Xusuusin Tababarka: Hel Dhibcaha ee Saacadaha Adeegga Gudihiisa

Kahor intaadan isu diiwaangelin tababarka, hubi inay liiska ku jiraan [MERIT](#) si aad u hesho dhibcaha shaqada iyo magdhawga tababarka.

Koorasyada lagu qaato meel ka baxsan MERIT, waa inaad soo gudbisaa Soo jeedinta waxbarashada sii socota (CEP) si aad u hesho dhibco adeega dhexdiisa. *Fadlan ogow: dib u bixinta tababarka diyaar uma aha doorashadan.*

Tilmaamaha sida loo dhamaystiro CEP waxay ku yaalaan [websaytka Diwaanka Shagaalah MERIT](#) ee ka hooseeya "Training".



## Xogaha Xeerka Fursadaha Billoowga Dhallaanka ee Loo Siman yahay: Naqshadeeynta Labada Luuqad iyo Daryeelka Xog ogaalka ah ee Dhaawaca

Kooxda PD waxay haysaa laba qaybood oo waaweyn oo ka mid ah [Fair Start for Kids Act \(FSKA\)](#) kuwaas oo taageera horumarinta tayada daryeelka ilmaha ee Washington iyada oo la adeegsanayo shaqada caruurnimada hore, waxay kala yihiin Magacaabista Labada Luuqad iyo Daryeelka Baahiyaha Dhaawaca Maskaxeed. Si aad wax badan uga ogaatid booqo:

### **Bogga webka Hindisaha Hadda**

## **Magacaabidda Labada Luuqadood, Gu'ga soo socda ee 2023!**

Xeerka Xaq u lahaanshaha Waxbarashada Caruurta waxa uu toosiyyaa DCYF si ay u dhisto Magacaabista Labada Luuqadood ee bixiyayaasha shatiga ama shatiga leh ee aqbala kaalmada gobolka ee ka qayb qaata Early Achievers, ECEAP, iyo Early ECEAP.

[Dual Language Designation](#) waxay aqoonsantahay barnaamijyada ay carruurtu ku bartaan tacliinta, dhaqan, iyo nuxur laba luqadood ama ka badan.



Nagu soo biir si aad wax badan uga barato magacaabista, faal'iidooyinka magacaabista, maalgelinta suurtagalka ah si kor loogu qaado jawiga barashada luqadaha badan, iyo sida loo codsado! *Casharkan khadka tooska ah waxa lagu qaban doonaa si toos ah Ingiriisi iyo Isbaanish.*

### **Casharka khadka tooska ah ee dhacaya Talaadada, Febraayo 28 | 6-7 pm**

### **Halkan iska diiwaangeli**

## **Kheyraadka Horumarinta Xirfadlaha ee Barashada Luuqadaha Badan**

Dhammaan bixiyeyaasha waxbarashada hore ee Washington State waxay heli karaan macluumaadka casharada khadka tooska ah ee ku saabsan waxbarashada khadka tooska ah ee qof awoodiisa ah iyo agab daabacan oo bilaash ah iyada oo loo marayo WIDA. Ma jiro wax kharash ah oo lagu samaysanayo koonto ama helitaanka kheyraad.

Si aad wax badan uga ogaatid, booqo [Bogga Barashada Labada Luuqad](#) oo riix “What is WIDA?” ee ku jira Su'aalaha Inta Badan la Iswaydiyo.

# Goobta Tababarka cusub ee DCYF- Waxaa la qabanayaa 2023!

Goobta Tababarka Cusub ee DCYF ayaa la daah-furaya dhawaan 2023 waxana ay bedeli doontaa LMS ka hadda jira, [DCYFtraining.com](https://DCYFtraining.com).



## Goobta Tababarka Cusub ee DCYF waxay noqon doontaa goobta:

- **Daryeel bixiyayaasha caruurtaay** kasoo raadsan doonaan, heli doonaan oo dhamaystiri doonaan tababaro
- **Tababarayaasha/ururada tababarka** ayaa maamuli doona, duubi doona oo abuuri doona dhacdooyinka tababarka
- **Shakhsiyadka** waxa uu codsan karaa in uu noqdo Tababarayaal Gobolku Ansaxiyay

## Goobta Tababarka Cusub ee DCYF way fududaan doontaa in la dhex maro oo waxay yeelan doontaa astaamo badan oo cusub, oo ay ku jiraan:

- Awooda lagu raadiyo tababbarka mowduuc ahaan, goobta, iyo in ka badan
- Habaynta luqadda - isticmaalayaashu waxay awoodi doonaan inay u turjumaan websaytka luqado badan
- Fariimo ogaysiis ah iyo ogeysiisyo ootamaatig ah
- Habka codsiga tababaraha la fududeeyay
- Hababka cusub ee barashada onlaynka ah
- Kheyraad badan ee makatabada

## Goorma ayuu Isbadalkani Dhici Doonaa?

Goobta Tababarka Cusub ee DCYF waxaa la daah-furi doona 2023 dhexdiisa. Waanu sii wadi doonaa bixinta wararka xaalada marka lagu dhawaado daah-furitaanka. Waa kuwan waxa laga filayo u gudbidayada Xarunta Tababarka Cusub ee DCYF ee 2023:

- Sida loo hago si loo caawiyo isticmaalayaasha inay adeegsadaan goobta
- Casharo onlays ah oo muujinaya shaqooyinka muhiimka ah ee goobta tababarka cusub
- Saacadaha shaqada tababarayaasha iyo ururada tababarka si ay uga caawiyaan isticmaalka goobta tababarka cusub oo ay uga jawaabaan su'aalaha
- Caawimaad farsamo oo shaqsi ahaaneed
- Tijaabinta isticmaalaha iyo samaynta agabka oo sii socda

Ilaa markaas, bixiyayaasha daryeelka ilmaha waxay sii wadi doonaan isticmaalka goobta tababarka hadda ([dcyftraining.com](https://dcyftraining.com)) si ay u helaan tababarada loo baahan yahay iyo tababarayaasha iyo ururada tababarku waxay sii wadi doonaan gelitaanka tababarada [MERIT](#). Wixii macluumaad dheeraad ah booqo:

## Goobta Tababarka Cusub ee DCYF

### Taxanaha siminaarka guga

Taxanaha [Casharada onlaynka ee Jilaalka](#) bilaabmay Janaayo. Haddii aad segtay webinars-ka, waxaad ka heli kartaa duubitaankayaga [Casharada onlaynka websaytka](#).



- **Casharka khadka tooska ah Janaayo: Goobta Tababarka Cusub ee DCYF**
  - [Duubitaa ka Ingiriisiga ah](#)
  - [Dubitaanka Isbaanishka](#)
- **Casharka Onlaynka ee Febraayo: Magacaabida Labada Luuqadood ee DCYF**
  - **Taariikhda:** Talaado, Febraayo 28
  - **Waqtiga:** 6-7 pm
  - [Halkan iska diiwaangeli](#)

Haddii aadan heli karin casharka khadka tooska ah, waxay u badan tahay inaan ka shaqeyneyno duubista oo aan soo galino. Haddii aad su'aalo gaar ah ka qabto casharka khadka tooska, iimayl u dir [Marlene White](#).

### Casharka Khadka tooska ah ee Maars: Wargalinta ku saabsan bandhiga ka Qeybgalinta!

Mudada lagu jiro [Taxanaha Casharka Khadka Tooska ah ee Dayrt](#), Wawaanu qabanay taxane laba qaybood ka kooban bilihi Noofambar iyo Disembar oo diiradda lagu saaray ururinta jawaab-celinta si loo qaabeeyo mustaqbalka taxanaha casharka khadka tooska ah.



Ka qaybgalayaashu waxay bixiyeen jawaab celin wanaagsan oo ku saabsan hababka ay DCYF u taageeri karto waxbarashada iyo horumarinta xirfadeed iyada oo loo marayo taxanahayaga webinar, iyo wixii ka dambeeyaa! Guudmar kooban waa la wadaagi doonaa oo la soo dhigi doonaa [boga websaytka ee casharada onlaynka ah dhawaan](#).

Kooxdadaydu waxa ay si hagar la'aan ah uga shaqaynaysay sidii ay u hirgelin lahayd jawaab-celinta oo ay u noqoto mid dhab ah. Inta lagu jiro casharkan onlaynka, wawaanu ku siin doonaa warbixin ku saabsan shaqadan iyo qorshayaashayada 2023. Kaalay oo nala wadaag!

*Casharkan khadka tooska ah waxa lagu qaban doonaa si toos ah Ingiriisi, Isbaanish iyo Soomaali.*

**Arbacp, Maars 22 | 6-7 pm**

## Halkan iska diiwaangeli

### Barnaamijka Tababarka iyo Tababarada Gobolku Ansixiyay

Ma waxaad tahay tababare ama ma xiisaynaysaa inaad wax badan ka ogato barnaamijka Tababarka ee Gobolka-Washinton uu ansixiyay? Wargeeska Kobcinta Shaqada ee ugu dambeysay waxaa loogu talagalay Tababarayaasha uu Gobolku ogolaaday.

Liis dhammaystiran oo ku saabsan Wargeesyada (Newsletters) Growing the Workforce waxaa laga heli karaa bogga Wargeesyada DCYF:

[Bogga websaytka Wargeeska](#)



### Taageerada Shaqaalaha ECE ee Waxbarashada

DCYF way garanaysaa qiimaha waxbarashada iyo shaqooyinka loo igmanayo cida lala shaqeeyo ee bulshada waxbarashada sare si loo qaabeeyo oo loo buuxiyo barnaamijyo waxbarasho oo kala duwan iyo deeqaha waxbarashada si loogu taageero shaqaalaha waxbarashada dhallaanka. Si aad ula socoto Xogaha barnaamijyadaan iyo waxbarashada kale, booqo:



[Deeqa waxbarashada, kaalmooyinka, iyo abaalmarinada](#)

### Deeqaha Waxbarashada Early Achievers: Sheeqooyinka Guulaha



"Tan iyo markii aan ku biiray barnaamijka Waxbarashada Caruurnimada Hore ee Renton Technical College, waxaan bartay wax badan. Awood u yeelashada in aan barto fikradaha iyo xaqiiqooyinka ku saabsan Waxbarashada Caruurnimada Hore waxay igu dartay 6 sano oo waayo-aragnimo ah oo daryeel ilmo ah. Waxa aan awooday in aan si toos ah ugu dabaqo aqoonta aan ku bartay fasalka xanaanada aan ka shaqeeyo. Midan waxa u sabab ah shaqada iyo qorshaha casharka oo aad looga fikiray oo macalimiintu ay abuureen. Dhamaan macalimiinta ku jira barnaamijka aad bay u fiican yihiin oo aqoon ugu leeyihiin mawduuca. Aad ayaan ugu mahad celinayaa in barnaamijka Early Achiever uu waxbarashadan siiyo shaqaalaha daryeelka caruurta maadaama ay aad u horumarisay barnaamijkeena".

-Danielle F.

"Aadayaan ugu faraxsanahay inaan qaato fasalkan waxbarashada carruurnimada hore, ee lagu bixiyay deeq early achievers. Dhamaan macalimiinta aad ayay u fiican yihii oo aad ayay u caawimaad badan yihii. Wax kasta oo aan baranayo waxay ku kordhinayaan aqoontayda, si aan u helo barnaamij ka wanaagsan. Sidoo kale maadaama Ingiriisig yahay luqaddayda labaad dhammaan macalimiintu aad bay u taageer badan, dulqaad leh oo naga caawinayay barnaamijkan. Markasta waxay isku dayayaan inay iga caawiyaan inaan wax walba si fiican u fahmo. Waxay ka jawaabaan su'aalahayga iyagoo bixinaya macluumaad aad u faahfaahsan. Waxay soo bandhigaan waxyabo badan oo muhiim aha iyo dhibco oo aad muhiim u ah oo faa'iido leh in lagu sameeyo la dhaqanka carruurta, si aan xiriir aad u wanaagsan ula yeelanno qoysaska iyo carruurta.



Aadayaan ugu mahadcelinayaa in barnaamijka Early Achiever uu waxbarashadan siiyo macalimiinta xanaanada caruuurta."

-Sharareh A.

## Nala wadaag!

Miyaad heshey deeqda Early Achievers oo ma doonaysaa inaad noo sheegto sheekadaada? Wuxa aad sheekadaada kusoo dirtaa Khabirka Waxbarashadeena Waxbarashada Dhallaanka (Early Childhood Education, ECE), [Sharene Leek](#), si loogu daro wargeyska soo socda.



## Rukumo Wargeeska PD

*Growing the Workforce* waa kheyraad loogu talagalay dhammaan shaqsiyaadka ku jira ganacsiga gaarsiinta taakuleyn waxbarasho xirfadeed shaqaalaha waxbarashada hore.

*Wargeysa PD* waxaa loogu talagalay inuu la socodsiyo bulshada waxbarashada dhallaanka ee Washington dhamaan shaqooyinka ee la xariira Hormarka Xirfadaha.

Rukumo

*Liiska fariimaha oo dhameystiran waxaa laga heli karaa boggeena [Wargeyska \(Newsletters\)](#).*

## Sidee Ayaynu Nahay?

Fadlan nala soo socodsii sida aan u sameyneyno samaynta degdeg ah [xog aruurin saddex-su'aal ah](#).

Hadii aad ka qabto su'aalo ama aad nala socodsiinayo mawduuc waxa aad la xidhidhaa [Marlene White](#).

